# THE SOMALI *pocket* COMPACT

## AF - SOOMAALI

newdeal

# THE SOMALI COMPACT-
*Waa dhukumenti waqtiga la soconay*



# SIDII HOREY LOOGU SOCON LAHAA

**CAQABADAHA** ay Soomaaliya wajahayso waa kuwo adag oo dhinacyo badan, kuna kala duwan xaaladaha siyaasadeed, bulsho iyo gobol. Istaraatiijiyadda lagu xalinayo caqabadahaan, si loo sameeyo **SOO-KABASHO**, **HORUMAR** iyo **NABAD WAARTA** waa inay ka mid yihiin:

- Hay'ado dowladeed oo xooggan
- Hoggaan heellan oo waxqabadku ka go'an yahay
- Kalsoonida dadka
- Wada-hadal bulsho oo wax-ku-ool ah
- Dhexdhexaadin iyo ka-qaybgalka Bulshada
- Xiriir caalami ah oo wanaagsan kuna salaysan is-qaddarin

# MABAADII’DA SHURAAKADA

**DEEQUHU** waxa ay laf-dhabar u yihiin fulinta heshiishka Cusub. Sidaa awgeed, waxaa habboon in dowladda iyo saaxiibadda horumarintu ay si adag uga shaqeeyaan **WAXTARNIMADA** kaalmada horumarinta ee Soomaaliya, ayna hubiyaan in deequhu horseedaan **NABAD-DHISID** iyo **QARAN-DHISID**. Tani waxay u baahanaysaa in loo guuro hannaan cusub oo loo bixinayo deeqaha taas oo ku salaysan **HESHIISHKA CUSUB**.

1. **Soomaali ayaa hoggaaminaysa, mulkiyaddana leh**
   DFS waxay dejinaysaaaa qorshe dhamaystiran oo kharashkiisa wata
2. **Waafajinta arrimaha mudnaanta u leh dowladda**
   Hab-raaca loo waafajinayo deeqaha waa in la dhamaystiraa Janaayo 2014
3. **Shuraako/Partnership**
   Dhammaan hawlaha waa in la qoondeeyaa iyadoo lala kaashanayo hay’adaha DFS
4. **Xoojinta nidaamyada maamulka dhaqaalaha dowladda ‘PFM SYSTEMS’**
   Dhaqaalaha waa in loo bixiyaa si waafaqsan miisaaniyadda dowladda
5. **Dhaqaalaha waxaa la marsiinayaa sanduuqa SDRF**
   Halbeegyada wax-qabadka si wadajir ah ayaa loo wada samaynayaa
6. **Kor-u-qaadista awoodda wax-qabad ee dowladda**
   DFS waa in qaab-dhismeedkaasi samaysaa Diseember 2013
7. **Isku-xidhka iyo Isu-duwidda**
   DFS waa in ay samaysaa nidaamyadii isu-duwidaa deeqaha Diseember 2013
8. **Madmadow-la’aanta iyo Saadaalinta**
   Waxa kaalmada loo samaynayaa aalad la yidhaa “development assistance database” taasi oo ah isha ugu muhiimsan ee macluumaadkaas
9. **Ka-taxadarka Khilaafka**
   Waxaa la samaynayaa dabagal joogto ah si looga fogaado sinnaan-la’aan dhaqaalaha iyo siyaasadda ah

## MABAADII’DA BENI-AADANNIMADA

Dowladda iyo saaxiibadeeda iskaashiga, waxaa ka go’an mabaa’dii’da **BENI AADANNIMADA, DHEXDHEXAADNIMADA, EEX-LA’AANTAIYO MADAXBANAANIDA SHAQADDA.**



newdeal

# HAY'ADDA HORUMARINTA IYO DIB-U-DHISKA SOOMAALIYA (SDRF)

- Waa xuddunta Heshiishka Cusub
- Waxa ay kor u qaadaysaa in **KAALMO TAYO LEH** la gaarsiiyo dhamaan Soomaalida
- Waa **HANNAAN** lagula soconaya laguna hagayo hawlaha saaxiibadda iskaashiga ee horumarka
- Samaynteedu waxa ay noqoneysaa mid waaqica ku dhisan oo tartiib-tartiib ah

## UJEEDDOOYINKA UGU MUHIIMSAN

- In **KHAYRAADKA** adeegsigiisa **LA WAAFAJIYO** meelaha mudnaanta ah ee lagu xusay Heshiiska Cusub iyadoo **DABA-GAL** iyo **KORMEER** la samaynayo;
- In si waaritaan leh **LOO DHISO AWOODDA-WAXQABAD** ee maamullada Soomaalida iyadoo hoggaanka ay qabanayaan hay'adaha Soomaaliyeed;
- In la fududeeyo wakhtiga kala-guurka ah sidii loo isticmaali lahaa **HANNAANKA MAARAYNTA DHAQAALAHA** ee **DALKA** , iyadoo la abuurayo lana xoojinayo nidaamkooda lagagana bilaabayo miisaaniyadda qaranka;
- In kor loo qaado **MADMADAW-LA'AANTA** iyo **ISLA-XISAABTANKA** maamulidda iyo gaadhsiinta deeqaha caalamiga ee Soomaaliya;
- In kharashaadka la yareeyo iyadoo **MEEL LA ISUGU GEYNAYO DEEQAHA**, si midaysana looga **WARBIXINAYO NATIIJADA.**

| | |
|---|---|
| **DHAQAALAHA** | Dhaqaaleyaal dhawr ah oo hal meel laga maamulayo iyadoo:<br>a) La isku xirayo hawlaha socda.<br>b) Wax laga wada qabanayo dhammaan PSG-yada<br>c) Nidaamyada oo la isku xidho sdi loo sameeyo horumar xilliga fog ah ee Hay'adaha dowladda |
| **MAAMULIDDA** | Maamulidda waxaa wadaagaya guddiyo qaab-dhismeed isku-xir ah leh (hoos ka eeg) |
| **DABAGALKA** | Waxaa la samaynayaa hab xooggan oo dhinaca war-bixinta iyo dabagalka waxqabadka ah iyadoo loo eegayo arrimaha mudnaanta u ah PSG-yada.<br>Waxaa la samaynayaa maaraynta khataraha iman kara<br>Waxaa la samaynayaa hannaan war bixineed oo marka ay muddo soo wareegtaba lagula soconayo horumarka la sameeyey |

# QAAB-DHISMEEDKA HESHIISKA

1

## Madasha ugu muhiimsan ee wada hadalka iyo doodaha

Waxa ay xuddun u tahay isku-xirka istaraatiijiyadaha iyo wadaagista macluumaadka.
Afartii biloodba mar ayaa la kulmaa, ugu yaraana hal mar oo heer wasiiro ah ama saraakiil sar-sare oo saaxiibadda horumarka ah.

2

## Guddiga Hagidda ee SDRF-ta

Waxa uu talooyin iyo tilmaamo siiyaa SDRF-ta ee fulinta qorshaha Heshiiska Cusub,gaar ahaan dhinacyada siyaasadda,,dhaqaalo-bixinta iyo geynta deeqaha meelihii loogu talo galay.

3

## DFS iyo Kooxaha Saaxiibadda Horumarka

Waa guddi farsamo oo qaabilsan samaynta siyaasadaha, qorshaynta iyo isku-xirka/ isku-duwidda barnaamijyada/mashaariicda

# DABAGALKA

1

## Natiijooyinka Nabad dhisidda iyo Qaran-dhisidda

Waxaa la qiimaynayaa natiijooyinka horumarka la sameeyey iyadoo laga duulayo PSG-yada iyo qodobada mudnaanta u ah
Halbeegyo mucayin ah oo wax lagu cabiro ayaa la samaynayaa december 2013 iyadoo loo eegi doono deegaanka, jinsiga, da'da iyo kooxaha bulshada

2

## Hadafyo-xilliyeedka PSG-yada

Qodobada mudnaanta ah fulintoodu halka ay marayso waxaa laga samaynayaa warbixino, waxana samaynaya DFS iyo kooxda saaxiibadda horumarka

3

## Waxqabadka DFS & Saaxiibadda Horumarka

Halbeegyo wax lagu dabagalo, laguna qiimeeyo ayaa la samaynayaa december 2013
Daraasad qiimayn ah ayaa la samaynayaa march 2014
Dareen gaar ah ayaa la siinayaa ka qaybgalka Haweenka iyo gabdhaha

**DIB-U-EEGISTA SANNAD LAHA AH EE HORUMARKA LA SAMEEYEY**

Waxaa la qabanayaa shir heer sare ah Diseembar 2014, iyadoo si joogto ah sannad kastana xilligaasi la qaban doono. Shirka waxaa diiradda lagu saarayaa fulinta guud ee Compact-ga, waxaa lagu cusboonaysiinayaa hadaf-xilliyeedyada (milestones) PSG-yada, waxaa lagu qiimaynayaa dhaqaalaha loo baahan yahay, iyadoo dib loo cusbooneysiinayo dadaalka Soomaaliya iyo Beesha Caalamka.

"In la gaaro Soomaaliya degan, nabad ah oo federal ah, iyadoo loo marayo Siyaasadda oo laga wada qaybgalo"

## PSG 1

### SIYAASAD LOO DHAN YAHAY

QODOBADA MUDNAANTA AH

1. **WADAHADAL**
   U dhexeeya DFS & maamuladda

   **DIB-U-HESHIISIIN**
   Kalsoonidii bulshada si loo soo celiyo
2. **DASTUURKA FEDERAALKA**
   Diseembar 2015
3. **DOORASHOOYIN LA AAMINI KARO**
   2016

"In la helo hay'addo amni oo mideysan, federal ah karti leh, la-xisaabtan leh, xaq ku salaysan, oo ammaankii aasaasiga ahaasiin kara muwaadiniintooda"

## PSG 2

### AMMAANKA

QODOBADA MUDNAANTA AH

1. **AWOODDA WAX-QABAD IY LA-XISAABTANKA**
   Hay'adaha aminga ee dawladda

   Xasilinta iyo bixinta
   **ADEEGGII AMNIGA**
2. Xooga ciidan oo lagu mideeyo nidaamka federaalka
3. Barnaamij qaran loo sameeyaa dagaalyahanada aan ciidanka ku jirin
4. **ISTARAATIYAD AMMAANKA BADDA AH**

**“ Samaynta hay’ado garsoor oo madax-banaan, lala-xisaabtami karo oo awood u leh in ay caddaalad siiyaan dadka oo dhan ”**

# PSG 3

## CADDAALADDA

**QODOBADA MUDNAANTA AH**

1. **SHURUUCDU WAA IN AY WAAFAQSAN YIHIIN**
   Dastuurka iyo halbeegyada caalamiga ah
2. Hay’adaha caddaaladda oo xalliya cabashada iyo Caddaalad-darrrada
3. In la helo caddaalad dhex ah oo kharash ahaan la awoodi karo

**“ Dib-u-soo-noolaynta iyo kobcinta dhaqaalaha iyadoo awoodda la saarayo helidda nolol-maalmeedka, shaqo-abuurka iyo guud ahaan korniinka dhaqaalahashaqooyin ”**

# PSG 4

## AASAAS DHAQAALE

**QODOBADA MUDNAANTA AH**

1. **KOR-U-QAADISTA WAX-SOO-SAARKA** iyadoo loo marayo dib-u-dhiska iyo ballaarinta kaabayaasha Dhaqaalaha
2. **SHAQAALAYSIINTA DHALINYARADA**
3. Hourmarinta iyo maamulidda **KHAYRAADKA DABIICIGA** AH iyadoo loo samaynayo sharci lagu dhaqo.

**"Adeegyada dowladeed oo loo siman yahay, la awoodi karayo, waaritaana leh, dakhliga oo loo ururiyo si aan madmadaw lahayn oo la xisaabtan leh sinaana loo wadaago"**

# PSG 5

## DAKHLIGA & ADEEGYADA DOWLADDA

### QODOBADA MUDNAANTA AH

1. **SHARCI LAGU DHAQO** oo loo sameeyo adeegyada Bulshada oo noqda qaar la heli karo lana awoodi karo
2. Dakhliga oo loo ururiyo qaab **MADMADAW-LA'AAN IYO LA-XISAABTAN** leh
3. **XOOJINTA NIDAAMKA MAAMULKA DHAQAALAHA DAWLADDA** sii loogu maamulo qaab madmadaw la'aan iyo wada-xisaabtan leh



newdeal

# ARRIMO ISKU XIRAN

Waxaa jira awood iyo aqoon yari ka jirta bulshada & ha'adaha, waxaa la dhisayaa awoodda hay'adaha dawliga ah

**KOR-U-QAADISTA AWOODDA WAX-QABAD**

Helidaa Caddaalad, Sharci-dejin Xuquuqda adannaha danaysa, dib-u-habaynta hay'adaha ammaanka,Difaacidda xuquuqda dadka nugul: IDP-yada, haweenka, carruurta, kuwa da'da ah, guddiga xuquuqda aadanaha, Hab-raaca xuquuqda adamaha kaddib ku-meelgaark 2013-2015

**XUQUUQDA AADANAHA**

**PSG 1: SIYAASAD LOO DHAN YAHAY**

**PSG 2: AMMAAN**

**PSG 3: CADDAALAD**

**PSG 4: AASAAS DHAQAALE**

**PSG 5: URURINTA DAKHLIGA IYO ADEEGGA BULSHADA**

**JINSIGA/ GENDER**

Meeqaamka haweenku bulshada kaga jiraan, Sinnaanta jinsiga, kaqayb-galka siyaasadda, helidda caddaalada, haweenka oo ka nabad-galaiyo tacadiyada jinsiga ku salaysan in awood dhaqaale loo sameeyo, waxbarasho & Caafimaadna ay helaan

**NATIIJO LA TAABAN KARO**

In la dhiso kalsoonida hay'adaha dowladda,la sameeyo Istaraatiijiyad xasilinta, Maamulo kumeelgaar ah ee heer degmo iyo gobol ah, Barnaamijyada mudnaanta lehna la fuliyo

**XIRIIRKA DIBADDA**

In Beesha caalamku taageerto la dagaalanka, argagaxisada, burcad-badeeda & tahriibka, qaxootiga,lana hubiyo hubinta taageero calamiya oo loo helo nabad-dhisidda, xisilinta iyo horumarka



newdeal

# HANNAANKA GAARKA AH EE SOMALILAND

## dhukumenti ‘wakhtiga la soconaya’

### ARAGTIDA 2030

- Lahaanshaha ajandaha horumarka
- Helitaanka dhaqaale, si caqabadaha horumarka loo xalliyo
- Dhaqaalaha in lagu aaddiyo mudnaanta Somaliland
- In qaab-dhismeed isku xidhan loo sameeyo istaraatiijiyadaha Somaliland & qorshayaasha lagu fulinayo

### QORSHAHA 5TA SANNO EE HORUMARINTA 2012 – 2016

- Waxa ay ku salaysan tahay wada-tashiga daneeyayaasha Soomaaliland
- Tiirarka maamul-wanaagga (PSG 1, 2, 3)
- Tiirarka kaabayaasha dhaqaalaha (PSG 4)
- Tiirka bulshada (PSG 5)

**HEER WADDANKA AH**

### QOONDAYNTA SOMALILAND EE GAARKA AH 2014-2016

- PSG-yada 1, 3, 4, 5
- Hannaan kor loogu qaadayo deeqaha caalamiga ah (mabaadii’da, qaabka dhaqaalaha loo bixinayo, isku-duwidda iyo kormeerka)

**HEER CAALAMI AH**

## “ Siyaasad Xasiloon iyo Dimuqradiyad ka shidaal-qaadaanysa dowlad-wanaag ”

**PSG 1**

**SIYAASAD LOO DHAN YAHAY**

**QODOBADA MUDNAANTA AH**

1. Dib-u-habaynta nidaamka doorashooyinka ka-qayb-galka haweenka iyo dadka laga tiro badan yahay
2. Baarlaman lala xisaabtami karo, hufan oo baahiyaha dadka ka jawaaba, xiriirna la sameeya deegaanka iyo dadkii soo doortay, la-xisaabtanka xisbigana ogol.

## “ Dhamaan dadka oo hela caddaalad wax-ku-ool ah oo waxtar leh ”

**PSG 3**

**CADAALADDA**

**QODOBADA MUDNAANTA AH**

1. In la xoojiyo **AWOODDAWAXQABAD EE MAXKAMADAHA**, iyadoo tababaro loo samaynayo, lana qalabaynayo
2. **IN LA KALA CADDEEYO KAALMAHA IYO MASUULIYADAHA** hay’adaha iyo guddiyada sharci-dejinta
3. **NIDAAM CADDAALADEED OO HEELLAN MAR WALBANA LA HELI KARO**

"In kor loo qaado maaraynta Khayraadka dabiiciga ah, wax-soo-sarka,tayada-waxqabad ee dadka, waxsoo lana abuuro jawi dhiirrigelinaya dhaqaalaha iyo maalliyadda"

# PSG 4

## AASAAS DHAQAALE

QODOBADA MUDNAANTA AH

1. Istaraatijiyad maalgashi oo dadka loo sameeyo, iyo kaabayaal wax-ku-ool ah
2. In la xoojiyo maalgashiga **DHINACYADA WAXSOOSARAKA**
3. In la helo hay'ado daymeed, maalgashi iyo Caymis oo wax ku ool ah
4. **IN SHAQOOYIN LOO** abuuro dhalinyarada
5. Istaraatiijiyad lagu maaraynayo deegaanka
6. Helidda koronto (tamar) la awoodi karo kharashkeeda

"Xoojinta awoodda ay xukuumaddu dakhliga ku ururin karto, khayraadka ku maarayn karto, adeegyo tayo lehna ku bixin karto"

# PSG 5

## DAKHLIGA IYO

QODOBADA MUDNAANTA AH

1. Hannaan ku habboon oo wax-ku-ool ah oo loo sameeyo **MAARAYNTA DAKHLIGA DOWLADDA**
2. **ADEEGYADA DOWLADDA** oo dadku ku helaan loo wada gaarsiiyo sinnaan
3. In shaqaalaha dowladda aqoon iyo sinnaan lagu helo

# ARRIMO ISKU-XIRAN

In laga wada qaybgalo hannaanka dimuquraadiyadda, in la xoojiyo ka-qayb-galka bulshada rayidka ah, xorriyad fikradaha iyo kulannada, horumar bulshadu waddo, ka wada qaybgalka siyaasadda, isla-xisaabtan iyo madmadaw-la'aan, iyo muwaadiniin dhammaantood heellan

Xeerka Guddiga Xuquuqda Aadana ee Somaliland, Guddida Xuquuqda Aadanaha iyo ururada xuuqda aadanaha ee aan dowliga ahayn oo lagu dhiirigelinayo in ay qiimayn iyo warbixinno ka sameeyaan

**XOOJINTA XIRIIRKA DOWLADDA & MUWAADINKA**

**XUQUUQDA AADANAHA**

**PSG 1: SIYAASAD LOO DHAN YAHAY**

**PSG 3: CADDAALAD**

**PSG 4: AASAAS DHAQAALE**

**PSG 5: DAKHLIGA IYO ADEEGYADA DOWLADDA**

**JINSIGA/GENDER**

Waa in Haweenku kaalin wacan ku yeeshaan arrimaha socda, lala dagaalamo sinnaan la'aanta awoodda & farqiga jinsiga ah iyo sidoo kale awood-yaraanta haweenka ee dhinaca siyaasadda

# MABAADII'DA ISKAASHIGA

Dowladda Somaliland iyo saaxiibbada iskaashiga ee horumarku waxaa ay cusboonaysiiyaan in ay ayidaan Mabaadii'da Waxtarnimada Deeqaha ee **PARIS** (2005), **ACCRA** (2008) iyo **BUSAN** (2011), oo ay ku jiraan Mabaa'diida **HESHIISKA CUSUB**. Iyadoo laga duulayo heshiisyadan caalamiga ah, dhammaan saaxiibadda horumarku waxa ay ballanqaadayaan in ay ixtiraamayaan mabaadii'dan soo socota:

1. **DOWLADDA SOMALILAND IYO SHACABKEEDA AYAA ISKA LEH**
   diyaarinta, fulinta iyo daba-galka hawlaha ay maalgeliyaan saaxiibada horumaintu
2. **KA-FEEJIGNAANTA KHILAAFKA**
   In la raaco mabda'a loo yaqaan "cidna ha dhibaatayn" ama "do no harm"
3. **AQBALAADDA IYO MAAREYNTA KHATARAHA**
   haddii aan dhinac ku lug lahayn
4. **KAALMADA CAALAMIGA AH OO LA WAAFAJIYO**
   meelaha mudnaanta u ah dowladda
5. **ISU-DUWIDDA DEEQAHA ISLA MARKAANA KALA CADDEYNTA DOORARKA**
   hay'adaha kala duwan ee caalamiga ah
6. **DHISIDDA AWOODDA WAX-QABAD**
   si waafaqsan istaraatiijiyadda dib-u-habaynta hay'adaha dowladda Somaliland & iyo hannaanka maaraynta dhaqaalaha dowladda
7. **XOOJINTA HANNAANKA MAARAYNTA DHAQAALAHA SOMALILAND**
   iyadoo la taageerayo hindisaha samaynta miisaaniyad furan
8. **KAALMADA DHAQAALE IN LAGU SHUBO HAY'ADAHA DHEXE EE DAWLADDA**
   si ku salaysan qorshe lagu wada heshiiyey
9. **MADMADAW-LA'AAN IYO KALSOONI-DHISID**
   ku aaddan kaalmada caalamiga ah, qaababka la raacayo waxa ka mid ah isticmaalka nidaamka "DAD" ee lagula socdo hawlaha horumarinta
10. **DHISIDDA AWOODDA ISTAATISTIKADA, KORMEERYA IYO QIIMEYNTA**
    si loo xaqiijiyo in natiijoyinka la gaaro

Iyadoo mabaadii'dan la raacyo, Somaliland & saaxiibadda horumarku waxa ay samaynayaa hab-raac mucayin ah, waxana ay dabagelayaan horumarka la sameeyey.

# HABKA MAALGELINTA

1. **SANDUUQA HORUMARINTA SOMALILAND (SDF)**
Si loo hubiyo in dhaqaalaha lagu isticmaalay dhinacyada mudnaanta u leh Somaliland, kharashkii la yareeyey, lacagtii xaabbada iskaashiga loo adeegsaday si habboon, isla markaana natiijooyin waaritaan leh la gaadhay,

2. **SANDUUQ AY MAALGELIYAAN SAAXIIBBO DHAWR AHI**
oo ku salaysan qorshayaasha horumarka, meelaha mudnaanta leh iyadoo la raacayo nidaamka dawladda

3. **QIIMAYN WADAJIR AH AYAA LAGU SAMAYN MAALGELINTA**
si dhaqaalaha koobani natiijo wax-ku-ool ah u keeno

4. **TAAGEERO DHAQAALE QAABABKA AY NOQONAYSO**
waxa la raacaayaa qaabka ay dawladdu jeceshahay in ay u hesho taageerada dibadda

5. **MASHAARIIC GAAR U TAAGAN**
oo ku salaysan dhinacyada mudnaanta u leh Somaliland, iyadoo la raacayo mabaadii'da saaxiibadda horumarka

# MAARAYNTA DEEQAHA

1. **GUDDIGA QORSHAYNTA QARANKA (NPC)**
15 wasiiro, guddoomiyaha Baanka Dhexe,xubno ka socda baarlamanka,aqoonyahanno, bulshada rayidka ah ayaa hagaya kala-mudnaansiinta iyo dabagalka
wasiirada ayaa isu-duwidda iyo maaraynta khataraha qaabilsan

2. **GOLAHA SARE EE ISU-DUWIDDA DEEQAHA (HLACF)**
Waxaa wada-guddoomiya dowladda iyo deeq-bixiyayaasha, waxa ay dib u eegaan meelaha mudnaanta kowaad leh & miisaaniyadda
Waxa ay qiimeeyaan horumarka la sameeyey
Waxa ay qiimeeyaan waxtarnimada deeqaha

3. **GOLAHA ISKU-XIRKA MASHAARIICDA**
Golahan waxa uu la kaashanayaa dhinacyada kale si ay u sameeyaan wadaaga macluumaadka iyo dib-u-cusboonaysiinta shaqada socota ee hawlaha dhinacyada mudnaanta leh

4. **GOLAHA ISKU-DUWIDDA DEEQAHA**
Waxaa wada guddoomiya dawladda iyo saaxiibadda horumarka
Golahan wuxu eegaa kala-mudnaanta iyo kharashaadka , qiimaynta guulaha hawlaha laga gaadhay, falanqaynta wax-ku-oolnimmada kaalmada

# HANNAANKA DABAGALKA

## NATIIJOOYINKA DOWLAD-DHISIDDA IYO NABAD DHISIDA

1

Waxaa la samaynayaa halbeeg la isla oggol yihiin dowladda saaxiibadda caalamiga ah
waxaa la xoojinayaa xog-ururinta joogto ah
waxaa la samaynayaa hannaan tirakoob (Statistics)

## QIIMAYN WADAJIR AH OO LAGU SAMEEYO MASHAARIICDA

2

Waqtiga iyo hadafyada ayaa la isla ogolaanayaa
Warbixinada waxaa wada samayaya Wasaaradda Qorshaynta Qaranka iyo Kooxaha Isu-duwidda Hawlaha (sector coordination forums)

## WAXQABADKA DOWLADA IYO SAAXIIBADDA HORUMARKA

3

Halbeegyo ayaa la samaynayaa Diseember 2013

## DIB-U-EEGISTA SANNAD –LAHA AH EE HORUMARKA LA SAMEEYEY

Shir heerkiisu sarreeyo oo isu-duwidda deeqaha ah ayaa la qabanayaa sannad kasta bisha October si dib loogu eego fulinta qoondaynta Somaliland ee gaarka ah, lana cusbooneysiiyo hadafyo-xilliyeedka PSG-yada, Iyadoo dibna loo qiimaynayo dhaqaalaha loo baahan yahay iyo dibna loo cusboonaysiiyo ballanta beesha caalamka.

# QAAB-DHISMEEDKA SDRF



# WIXII MACLUUMAAD DHEERI AH

Booqo:- http://newdeal.so/

…waxaad naga helaysaa

@SomaliaNewDeal